my ENERGY saving home

# Sida loo isticmaalo qalabkaaga cusub ee wax lagu kariyo



Somali | Soomaali

## Waxa aad filan karto iyo sidoo kale talooyin ku saabsan sida loo isticmaalo loona daryeelo

### Faa'iidooyinka muhiimka ah

**Mid si degdeg wax u kululeynaya:** Biyaha oo la karkariyo iyo cunto karinta way ka dhaqso badan tahay marka la isticmaalayo shooladaha ku shaqeeya gaaska ama korontada. Waxyaabaha lagu kariyo Wok sidoo kale waa ay sahlan tahay!

**Waa mid badbaado ah:** Ma jiraan wax holac ah ama qiiqa ka dhasha gaas ka oo aad arkayso. Dusha sare dhaqsi ayay qaboow noqotaa marka la isticmaalo ka dib.

**Si sahlan ayaa loo daryeeli karaa:** sagxad siman oo ay fududahay in la nadiifiyo.

**Xakamayn sare:** Heerkulka waxaa si degdeg ah looga dhigi karo halka ay ku haboon tahay.

**Wuxuu beekhaaminaya korontada:** Wuxuu isticmaalaa koronto yar. Wuxuu kuu beekhaaminaya lacag oo sidoo kalena wuxuu u fiican yahay jawiga.

### Xusuusin la xiriirta badbaadada

- Haddii jirkaaga la dhexgeliyay qalab caafimaad, la tasho dhakhtar ka hor intaadan isticmaalin mashiinka cuntada lagu kariyo.
- Birqabatada korontada ayaa laga yaabaa inay saameyso qaar ka mid ah waxyaabaha jirka kujira (implants), marka loo dhaweeyo meesha cuntada lagu kariyo.
- Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka fogaato inta gacantaada dheerarkeeda la egyahay oo kale.

### Sida ay u shaqeeyaan iyo baahida cunto karinta

- Qalabkan wax lagu karsado waxay isticmaalaan dhul koronto-magneteed ah oo ka hooseeya muraayadda si ay u kululeeyaan digsiyada.
- Kuleel ma noqonayo ilaa inta uu qalabku ka dareemayo aayron (iron) ku filan oo kaga imaanaya digsiga.
- Si aad u tijaabiso dheriga iyo digsiyadaada, dhig magnet xagga hoose. Haddii ay ku dhegto, waa la isticmaali karaa!
- Haddii dherigu ama digsigu uusan lahayn aayron (iron) ku filan, qalabkan ma shidmi doono.
- Waxaad ka soo iibsan kartaa dheri iyo digsiyo cusub oo qiimo jaban oo aad ka heli karto dhammaan dukaamada waaweyn. Raadi calaamadda saxanka wax kululeeya.

### Talooyin muhiim ah

1. Isticmaal dheri iyo digsiyo leh sal ama sagxad siman.
2. Marwalba ka qaad digsiyada saxanka wax kululeeya. Haku jiidin si aysan sagxada muraayada ah u xoqin.
3. Ha saarin waxyaabo aad u culus qalabkan wax lagu kariyo.
4. Wax haku karin qalabkan wax kululeeya haddii uu jaban yahay ama uu dilaac kujiro. Haddii dusha sare ee meesha cuntada lagu kariyo ay jaban tahay ama dillaacdo, ka dami korontada dusha sare. Kabacdina la xidhiidh Xarunta Wicista ee Guryaha.
5. Haddii aad isticmaasho dheri iyo digsi ka sameysan aayron (iron), si tartiib ah u kululee si uusan u dillaacin.
6. Ha saarin kaararka bangiyada, kaadhadhka xusuusta ama qalab elegtaroonik ah meel u dhow qalabkan wax lagu kariyo. Waxa laga yaabaa inay wax u dhinto sagxada wax lagu kululeeyo.

homes victoria

VICTORIA State Government


## Sida loo nadiifiyo dusha sare ee wax lagu kariyo

Si qalabkan wax lagu kariyo uu nadiif kuugu ahaado ka ilaali cuntooyinka u baahan in la dubo, markastood isticmaasho kabacdina madax dusha sare (marka ay meeshu qaboowdo).


Sida loo nadiifiyo qalabkan wax lagu kariyo waa ay fududahay waxayna u baahan tahay oo kaliya dhowr alaabaha wax lagu nadiifiyo ah:



Saabuun iyo biyo, khal cad, baking soda, (ama dhoobada lagu nadiifiyo qalabka wax lagu kariyo)



suuf, maro ama tuwaal waraaq ah oo aan xoqayn oo nadiifinta loogu talagalay



Maro engegan ama maro microfibre ah si aad ugu qalajiso/ugu tirtirto

### Tallaabooyinka

**1**



Marka hore demi dusha sare ee wax lagu kariyo inta aanad nadiifin.

**2**



Ku buufi waxyaabaha wax lagu nadiifiyo dusha sare ee wax lagu kariyo. Ku masax dusha sare suuf aan xoqeyn, maro ama tuwaal warqad ah.

**3**



Si aad uga nadiifiso raashinka dhagdhega ah iyo wasakhda meesha ku dhegan, ku shub alaabaha wax lagu nadiifiyo oo u dhaaf ilaa dhowr daqiiqo. In yar oo khal cad ah iyo baking soda ayaa kaa caawin kartaa inay goyso waxyaabaha meesha ku dhegay. Suufka, maro ama tuwaal warqad ah ku nadiifi wixii dhegdheg ah ee meesha ku haray.

**4**



Ku tirtir dusha sare ee meesha wax lagu kariyo maro jilicsan oo engegan. Inaad isticmaasho wax yar oo khal cad ah waxay kaa caawin doontaa inaad kasii nadiifiso waxyaabaha lagu nadiifiyay meesha ee kusii hari kara.

### Talo muhiim ah

**Fadlan ha isticmaalin tan lagu nadiifiyo dariishadaha, ammonia, warankiilo, istiil xoqaya meesha, ama wixii kale ee xoqi kara sagxada. Waxyaabahaas waxay wasakhayn doonaan ama xoqi doonaan dusha sare ee qalabka wax lagu kariyo.**

### Wax badan ka ogow

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, ama aad u baahan tahay tarjumaad, booqo

homes.vic.gov.au/how-do-i-use-my-new-appliances

wac **13 11 72** ama iimayl ugu dir **energyefficiencyprogram@homes.vic.gov.au**

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.
© Gobolka Victoria, Homes Victoria, bisha Juun 2025. Daabacaad ay maamusho Finsbury Green (HV027824)